

Adeegyada Taageero ee Qoyska

ee ku jira *Early Childhood Education and Assistance Program (Waxbarashada Barbaarinta Carruurta iyo Barnaamijka Caawimada)*

Early Childhood Education and Assistance Program (Waxbarashada Barbaarinta Carruurta iyo Barnaamijka Caawimada, ECEAP)

waxa ka go'an bixinta adeegyo isku dhafan oo tayo sare leh, balaadhan, iyo Barbaarin loo siman yahay oo diirada saaraya dhammaan qoyska oo koobsanaya waxbarashada Barbaarinta, taageerada qoyska, kaqeybgalka qoyska, caafimaadka jidhka, ilkaha, iyo maskaxda, iyo adeegyada nafaqada. Nidaamka Adeegyada Balaadhan ee ECEAP wuxuu tixgalinayaa baahiyaha carruurta iyo waalidiinta ku jira adeegyada iyo barnaamijyada nashaqada iyo gudbinta. Cilmi-baadhis ayaa muujisay ula shaqeynta carruurta iyo qoysaska qaab labo jiil ah iyo siinta taageero qoysasku aanay kaliya saameyn koriinka ilmaha balse sidoo kale awooda qoysku kaga caawinayo ilmaha inuu koro oo kobco. Adeegyadani waxay taageereen natiijoyin dhaqaale, waxbarasho, caafimaad jidheed, ilko, iyo maskaxeed oo horumaray.



Ilmo Lala Kaashaday Qoyska

Dhanka ECEAP, qoysasku waxay ula kulmaan shaqaalaha si joogto ah si ay uga siiyaan talo hadafyada waxbarasho ilmaha.

QOYSKA OO DHAN

Nidaamka labada jiil ee ECEAP wuxuu xooga saarayaa qoyska oo dhan si ku talagal ah isagoo ula shaqeynaya carruurta iyo daryeel-bixiyayaashooda waayeelka ah.

Waayeel lala Kaashaday Qoyska

Dhanka ECEAP, shaqaalaha ayaa la kulma waalidiinta si ay u sameeyaan hadafyada beegsanaya qoyska iyagoo isticmaalaya nidaamka Mobility Mentoring® (Tababarka Moobilka).



Beegsanaya Ilmaha

Baadhitaanka koriinka baadhitaanada caafimaadka Waxbarashada Gaarka ah

Waxa ay qoysasku ka yidhaahdeen ECEAP:

“Shaqaalaha ECEAP ayaa i siiyey caawimo anoo isku dayaya inaan la tacaalo noqoshada hooyo kaligeed ah waana arin cajiiba in lala dejiyo hadafyo dad i fahmaya igalana shaqeynaya in aanan kaliya wanaajin noloshu ilmahayga balsd sidoo kale ta qoyskeena. Ka diwaangalinta canugayga ee ECEAP waxay dhab ahaantii ahayd mid ka mida go'aamada ugu wanaagsan ee aan waligay sameeyey.”



Beegsanaya Waayeelka

Khayraadka iyo Gudbinaha Caawimada Waalidka Caawimada Fahamka Nidaamyada



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Adeegyada taageerada qoyska ee ECEAP waxay isticmaalaan Mobiliy Mentoring® (Tababarka Moobilka) kaasoo ah nidaam 2jiil ah oo ku saleysan sharciga ah in carruurto horumarto marka waalidkood dadaalaan iyo badelkeeda. Istimaal ka nidaamkan tababareed, shaqaalaha caawimada qoyska ayaa siiya qoysaska khayraadka iyo tilmaam ay uga baahan yihiin qof raba inuu dhageysto. Adeegyadani waxay ku dadaalaan xoojinta qoyska si uu yareeyo walaaca una kordhiyo ku xidhnaanshaha dadka kale.



Mobility Mentoring® (Tababarka Moobilka) waxa uu isticmaalaa rabitaan lagu gaadhayo deganaan dhaqaale. Salaankaasi wuxuu siiyaa sees adag oo ka caawiya qoysasku inay helaan qaab ay ku horumaran kuna xoojiyaan degaanshahooda dhaqaale. Nidaamkan ku saleysan awoodaha waxa loogu talagalay in lagula kulmo qoysasku halka ay joogaan, lagu raaco tilmaamtooda, isticmaalo nidaamyo dhaqan ahaan xoogan, oo loola shaqeeyo qoyskasta si wadajir ah maadaamoo ay ku jiraan safarka dariiqada madaxbanaanida. Sidaasi daraadeed, safarkasta wuxuu la gaar yahay hadafyo ka turjumaya qoysaska sidoo kalena ku dadaalaya ugu sareynta tiir kasta.

Tusaaleyaasha caawimada waxa loogu talagay shaqsi kasta oo ka mid ah qoyska:

- Barashada xirfadaha maamul ee dabeecadaha (loo isticmaalo fasalka dhexdiisa) in waalidku ay ku isticmaalaan guriga.
- Agabka, caawimada, iyo macluumaad qoysaska u baahan in ay carruurtooda ku ilaaliyaan horumarka akhriska.
- Shaqaalaysiin deg-deg ah iyo khayraadka shaqo la'aanta.
- Khayraadka guryeynta, waxbarashada waalidka, miisaaniyada, iyo siiwadida waxbarashada.
- Caawimo dheeraad ah oo ah dhinaca arimaha bulshada iyo daryeelka wanaagsan ee ubadka iyo qoyska.

Deganaanta			Xiriirka Naftaada iyo Dadka kale		Maamulida Lacagta		Waxbarashada iyo Qorsheynta Tababarka		Shaqaaleysiinta iyo Maamulida Xirfadaha	
KIRADA	BADQABKA QOYSKA	WAALIDKA	BADQABKA	DAREENKA KA MID AHAANSHAHA	CAAWIMOOPYINKA GAARKA AH IYO KUWA SHAQOOPYINKA	KHARASHAADKA	QORSHEYNTA	WAXBARASHADA	HEERARKA DAKHLIGA	
Waxaan haystaa guri badqaba, la awoodo, degan oo buuxiyey baahiyaha qoyskayga.	Baahiyaha qoyskayga waxa loo buuxiyey habab ii saamaxaya inaan diirada saaro hadafkayga.	Waan ka warhayaa kana jawaabaa baahiyaha koraaya ee ilmahayga. Waxaan heli karaa khayraadka hadii loo baahdo.	Waxaan si buuxda uga qeyb qaadan karaa noloshay maxaa yeelay waan caafimaad qabaa.	Waxa la igu daray kana qayb qaadanayaa bulshadayda.	Waxaan leeyahay xiriiro gaara oo iga caawinaya inaan ku guulaysto hadafyadayda.	Waxaan haystaa khayraadka aan si kalsooni leh ugu maamuli karo dayntayda.	Waan buuxin karaa baahiyaha dhaqaale ee qoyskayga imika iyo mustaqbalkaba.	Waxaan leeyahay xirfado, waxbarasho iyo tababar igu filan si aan u doorto xirfada aan rabo.	Waxaan la qaataa mushahar shaqo buuxisay hadafyadayda xirfadeed iyo mustaqbalba.	

Laga soo Qaatay Economic Mobility Pathways (EMPath) Bridge to Self Sufficiency (Nidaamka Dhadhaqaaqa Dhaqaale (EMPath) Biriishka Isku Filnaanshaha).

DCYF ma takooro waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgaliin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed. Haddii aad rabto nuqullo dhukumentihii ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qaybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov.
DCYF PUBLICATION EL_0079 SM (11-2023) Somali